

DRC DANSK
FLYGTNINGE
HJÆLP

Adeegyada La-talinta ee Mutadawacnimada h ee Danish Refugee Council



Ku saabsan Adeegga La-talinta ee Mutadawacnimada ah

Waxaanu kaala tallin karnaa:



Degenaanshaha rasmiga ah

Waxaan kaala tallin karnaa shuruudaha la xiriira degenaanshaha rasmiga ah. Waxaan kaa caawin karnaa inaad buux-buuxiso oo aad gudbis codsiga waxaanan ku siin karnaa macluumaad ku saabsan qaadashada racfaanka.



Dib-u-midaynta qoyska

Waxaan kaala tallin karnaa shuruudaha la xiriira dib-u-midaynta qoyska. Waxaan kaa caawin karnaa inaad buux-buuxiso oo aad gudbis codsiga waxaanan ku siin karnaa macluumaad ku saabsan qaadashada racfaanka.



Jinsiyadda Denmark

Waxaan kaala tallin karnaa shuruudaha iyo hanaanka loo maro jinsiyadda Denmark. Waxaan kaa caawin karnaa buux-buuxinta iyo gudbinta codsiga.

Ku saabsan Adeegga La-talinta ee Mutadawacnimada ah Sideen kuu caawin karnaa?

Adeegga La-talinta ee Mutadawacnimada ah ee DRC Danish Refugee Council, qaxootiga iyo dadka asal ahaan ka soo jeeda dadka laga tirada badan yahay waxay heli karaan la-talin bilaash iyo dhexdhexaad ah oo ay bixiyaan khubaro aqoontoodu kala duwan tahay.

Waxaan kaala tallin karnaa dib-u-midaynta qoyska, degenaanshaha rasmiga ah iyo jinsiyadda Denmark. Waxaan sidoo kale kaa caawin karnaa fahamka xukunada, waraaqaha ay soo diraan mas'uuliyiinta dawladdu, waxaanan ku siin doonaa macluumaad ku saabsan xulashooyinka racfaanka iyo waxyaabo kale oo badan.

Nasiib darro, ma awoodno inaan kaa caawinno helitaanka hoy, inaan kaala talino gargaarka bulshada, ama qabano dacwadaha sharciga ah. Sidoo kale ma bixino talo ku saabsan magangalyada. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan magangalyada ama dib-u-noqoshada (ku laabashada ikhtihaariga ah ee dalkaagii hooyo), fadlan la xidhiidh magangalyada **DRC Danish Refugee Council**.

ii_mayl: advice@drc.ngo ama soo_return.Advice@drc.ngo

Taleefan: +45 33 73 50 00 Isniin-Jimce inta u dhaxeysa 9am-3pm.

Goobta Adeegyada La-talinta ee Mutadawacnimada ah




Copenhagen



Macluumaadka xiriirka iyo

ciwaanka: Iskaan garee
koodka-QR



Saacadaha shaqada:

Arbaca 5pm-8pm
Khamiis 1pm-4pm



limayl: rkbh@drc.ngo

Macluumaad muhiim ah:

Kaalay goobta oo sug la-taliye
mutadawac ah oo diyaar ah. Waa inaad
ku talagashaa inaad muddo wakhti ah
sugto. Fadlan la soco inay jiri karaan
maalmo ay goobtu xidhan tahay. Booqo
boggayaga internetka si aad u hesho
macluumaad dheeraad ah.


FIIRO GAAR AH! Haddii aad u baahan
tahay la-talin onlayn ah, turjubaan, ama
haddii ay jiraan duruufo gaar ah oo ay
waajib tahay in aan ka warqabno, fadlan
hore noola soo xiriir.

Ringsted



Macluumaadka xiriirka iyo

ciwaanka: Iskaan garee
koodka-QR



Saacadaha shaqada:

Arbaca 3:30pm-5:30pm



Iimayl: raadgivning.ringsted@drc.ngo

Macluumaad muhiim ah:

Ballan kaliya.

Fadlan la soco inay jiri karaan
maalmo ay goobtu xidhan tahay.
Booqo boggayaga internetka si
aad u hesho macluumaad
dheeraad ah.


FIIRO GAAR AH! Haddii aanu
qaban wayno taleefanka, fadlan
fariin noogu dhaaf fariimaha
codka (voicemail) ama noo soo
dir iimayl. Waanu kuu soo jawaabi
doonaa.

Odense



Macluumaadka xiriirka iyo

ciwaanka: Iskaan garee
koodka-QR



Saacadaha shaqada:

Isniin 4pm-7pm



Iimayl:

raadgivning.odense@drc.ngo

Macluumaad muhiim ah:

Kaalay goobta oo sug la-taliye
mutadawac ah oo diyaar ah. Waa inaad
ku talagashaa inaad muddo wakhti ah
sugto. Fadlan la soco inay jiri karaan
maalmo ay goobtu xidhan tahay. Booqo
boggayaga internetka si aad u hesho
macluumaad dheeraad ah.

FIIRO GAAR AH! Haddii aad u baahan
tahay la-talin onlayn ah, turjubaan, ama
haddii ay jiraan duruufo gaar ah oo ay
waajib tahay in aan ka warqabno, fadlan
hore noola soo xiriir.


Århus



Macluumaadka xiriirka iyo

ciwaanka: Iskaan garee

koodka-QR



Saacadaha shaqada:

Isniin 5pm-7pm



limayl:

raadgivning.aarhus@drc.ngo

Macluumaad muhiim ah:

Ballan kaliya.

FIIRO GAAR AH! Haddii aad u baahan tahay la-talin onlayn ah, turjubaan, ama haddii ay jiraan duruufo gaar ah oo ay waajib tahay in aan ka warqabno, fadlan hore noola soo xiriir.


Aalborg



Macluumaadka xiriirka iyo

ciwaanka: Iskaan garee

koodka-QR



Saacadaha shaqada:

Salaasa 5:30pm-7:30pm



Iimayl:

raadgivning.aalborg@drc.ngo

Macluumaad muhiim ah:


Ballan kaliya.

FIIRO GAAR AH! Haddii aad u baahan tahay la-talin onlayn ah, turjubaan, ama haddii ay jiraan duruufo gaar ah oo ay waajib tahay in aan ka warqabno, fadlan hore noola soo xiriir.

Haderslev



**Si aad u oggaato
cinwaanka, lambarka
taleefanka iyo saacadaha
shaqada:** Iskaan
gareekoodka -QR



limayl:
drchaderslev@frivillig.drc.ngo

Macluumaad muhiim ah:

La-talin bilaa ballan ah. Kaalay
goobta oo sug la-taliye mutadawac
ah oo diyaar ah.

Holstebro



Macluumaadka xiriirka iyo

ciwaanka: Iskaan garee

koodka-QR



Saacadaha shaqada:

Salaasada toddabaad dhaaf kasta 4pm-6pm



limayl:

raadgivning.holstebro@drc.ngo

Macluumaad muhiim ah:


La-talin bilaa ballan ah. Kaalay goobta oo sug la-taliye mutadawac ah oo diyaar ah.

Macluumaad ku saabsan ballan qabsashada

In ballan loo qabsado ayaa laga maarmaan u ah Adeegyada La-talinta qaarkood.


Dulmarka boggagii hore, waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan Adeega La-talinta ee shaqsiga ah iyo haddii in ballan la qabsado ay lama huraan u tahay. Fadlan la soco in ay jiri karaan maalmo uu xidhan yahay xafiiska Adeegyada La-talintu. Wixii macluumaad intaa dheer, booqo boggayaga internetka:

www.frivillig.drc.ngo/frivilligraadgivning



Ma u baahantay turjumaan mutadawac ah?

Waxaan bixinaa ikhtiyaarada aad ugu dalban karto turjumaan si fool ka fool ah ama onlayn. Fadlan la soco in turjumaanka mutadawaca ah lagu heli karo oo keliya ballan hore loo sii qabsaday. Si aan u xaqiijino inaan bixin karno turjumaan mutadawac ah, waxaa lagugula talinayaa inaad hore ballan u sii qabsato. Waxaad codsan kartaa turjumaan mutadawac ah markaad qabsato ballanka la-tashigaaga. Haddii aanaan hayn turjumaan mutadawac ah oo diyaar ah, ama haddii aan heli wayno turjumaan mutadawac ah oo luuqadaada ku hadla, fadlan soo kaxeeyso qof ka weyn 18 jir oo aad ku kalsoon tahay oo wax kuu turjumi kara.



Yaa bixiya la-talinta?

La-taliyayaasha mutadawaca ah waxay haystaan shahaadooyin sharci, waa shaqaale bulsheed ama waa xirfadlayaal kale oo qaatay tobabar isla markaana leh waayo-aragnimo la xidhiidha hawshan kuwaas oo bixiya la-talin bilaash ah oo loo bixiyo si mutadawacnimo ah. La-taliyayaasha waxaa saaran waajibaadka ilaalinta sirta, macluumaadkaaga shakhsiyeedna had iyo jeer waxaa laga dhigaa mid ammaan iyo qarsoodi ah.

Ma nahay la-taliyayaal kugu habboon? Waxaan kaa caawin doonaa inaad hesho xalka ugu fiican.

Haddii aanad hubin in aan nahay la-taliyayaal kugu habboon, marka aad doonto ayaad nala soo xidhiidhi kartaa si aanu wax kuugu kala cadeyno. Haddii aanu ku caawin kari wayno, waxaan jeclaan lahayn inaan kuu gudbino la-talin kugu habboon ama dalabyada kale ee ku habboon baahiyahaaga.



Ma rabtaa inaad wax badan ka oggaato Adeega La-talinta ee Mutadawacnimada ah?

Booqo boggayaga internetka: www.frivillig.drc.ngo/frivilligraadgivningen
ama sawirka koodka-QR

Bogga internetka waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan Adeega La-talinta ee Mutadawacnimada ah, Adeegyada La-talinta ee shaqsiga ah iyo cinwaanadooda, saacadaha ay shaqeeyaan, maalmaha aysan shaqeyn, sidoo kale waxaad ka heli kartaa macluumaadkayaga oo ku qoran luqado badan.

Haddii aad leedahay taariikh iyo/ama waayo-aragnimo habboon oo aad jeclaan lahayd inaad noqoto la-taliye mutadawac ah, aad ayaa laguugu soo dhaweynayaa inaad nala soo xidhiidho.

FIIRO GAAR AH: Ha ku soo dirin macluumaadka shakhsiyeed ama xasaasiga ah iimaylka.

